

# Waa maxay Adeegyada Dhamaystiran ee Early Childhood Education and Assistance Program (Waxbarashada Barbaarinta Caruurta iyo Barnaamijka Caawinta, ECEAP)?

Adeegyada dhammaystiran ee ECEAP waxaa loogu talagalay inay soo dhaweeyaan dhammaan ilmaha iyo qoyska oo dhan iyo taageeridda iyo ka jawaabista baahiyahooda shakhsi ahaaneed iyo duruufahooda. ECEAP waxay bixisaa adeegyadan hoos yimaada hal dalad: Dhalashada-Waxbarashada Xanaanada Kahor, taageerada qoyska, wada shaqaynta qoyska, caafimaadka, caafimaadka maskaxda, iyo nafaqada. Adeegyada taageeraya qoyska oo dhan waxay caddeeyeen inay saameeyaan horumarka ilmaha iyo awoodda qoyska si ay u caawiyaan ubadka korriinka iyo koboca. Adeegyadani waxay taageeraan horumarka dhaqaalaha, waxbarashada, iyo natiijooyinka caafimaadka.



## Waxbarashada Dhalashada-PreK

- Manhaj cilmi-baadhis ku salaysan iyo dhaqan ahaan la xidhiidha.
- Qorshaynta iyo tilmaamaha gaarka ah.
- Baadhitaanka korriinka.
- Qiimeynta socota ee la socota horumarka ilmaha ee ujeedooyinka iyo dhinacyada waxbarashada.
- Dhaqamada loo dhan yahay iyo deegaanka taageerta helitaanka carruurta.
- Qoysasku waxay iskaashi la sameeyaan macallimiinta si ay u horumariyaan yoolalka waxbarashada oo ku salaysan awooda, xirfadaha iyo baahiyaha ilmaha.





## Taageerada iyo La Shaqaynta Qoyska

- Booqashooyinka taageerada qoyska, iyadoo la adeegsanayo habka Hagidda Dhaqdhaqaaqa® si loo abuuro yoolalka ay wadaan qoysasku.
- Caawimada waxa loogu talagay qoys kasta.
- Khayraadka iyo gudbinaha ka jawaabaya baahiyaha qoyska.
- La siiyo goob ammaan ah halkaasoo waalidka laftoodu ay kula wadaagi karaan oo ay ku dhisi karaan xidhiidh fiican oo ay la yeeshaan.
- Xoojinta xidhiidhka ka dhexeeya dugsiya iyo guriga kaas oo kor u qaada oo taageera waxbarashada carruurta.
- Waayo-aragnimada hoggaamineed ee taageerta waalidnimada, shaqada, ama yoolalka noloshu.
- Fursadaha ka qaybgalka qoyska waxaa ka mid noqon kara:
  - Dhacdooyinka qoyska
  - Waxbarashada waalidka
  - Iskaa wax u qabso fasalka dhexdiisa



## Caafimaadka, Caafimaadka Maskaxda, iyo Nafaqada

- Isku xidhka caymiska caafimaadka iyo kan ilkaha ee guryaha dhexdooda lagu qabto.
- Baaritaannada caafimaadka ee ka hortagga ah, oo ay ku jiraan aragga iyo maqalka.
- Ku xidhida ilaha bulshada iyo u gudbinta talaalka ilmaha, caafimaadka guud iyo baahiyaha caafimaadka dhimirka.
- Cunto caafimaad leh oo nafaqo leh oo aan kharash ku baxayn.
- Barashada ku saabsan cunto fudud iyo cunto caafimaad leh gudaha fasalka.
- Ku xidhida qoysaska bulshada deegaanka iyo agabka gobolka oo dhan ee cuntooyinka sida:
  - SNAP
  - WIC
  - Goobaha cuntada



DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, asal ahaan halka uu kasoo jeedo, muwaadinimada ama xaalada socdaal, da'da, wacyiga jinsi ama aqoonsiga jinsiga, mujaahid ama xaalada milatari, xaalada hooyada ilmaha naas-nuujinaysa, iyo helitaanka dareen kasta oo jidheed, ama naafanimo maskaxeed ama isticmaalka hagitaanka eyga ama adeegyada xayawaanku qabto. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).